Washington State Parks

Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo

Baarkinadee, dhulkee nasasho ayaa furan?
Laga bilaabo Juun 4, inta badan dhulalka ay dawladdu maamusho ayaa dib loo furay **si loo isticmaalo maalintii**.

Kaamamka ayaa dib u furmaya gobollo badan oo u guuray Wajiga 2 ee dawlada. Jay Inslee's waxay bilaabeen qorshe nabdoon.

Bilaabidda doonyaha ay dowladdu maamusho iyo heerjabiyaha baarkinada gobolka ee Wajiga 2 ayaa sidoo kale furan.

Si aad u ogaato xaalada ay haatan ku suganyihiin xeryaha, beeraha nasashada iyo dhulalka kale ee ay dowladdu maamusho ee madadaalada booqo:

- Washington State Parks — xaalada baarkinada
- Washington Department of Fish and Wildlife — Liiska lifaaqa iyo xayiraadaha
- Washington State Department of Natural Resources — dib u furista goobaha madadaalada

Ogow: Baarkinada qaar ee wajiga 2 ee gobolada **wali lama furin** kaamamka isla markiiba, iyada oo ku saleysan jihada saraakiisha gobolka. Washington State Parks Waxay taakuleysaa oo ay sii wadaysaa la shaqeynta jaaliyadaha si loo helo habka ugu wanaagsan ee dib loo furo kaamamka.

Ma u baahanahay Discover Pass?
Haa. The Discover Pass waxaa looga baahan yahay inuu gaarigaaga dhigto meelaha madadaalada gobolka iyo meelaha marin biyoodka ee ay maaraysay Washington State Parks iyo Department of Natural Resources (DNR). Dhulkan waxaa ka mid ah baarkinada gobolka, meelaha biyaha laga helo, meelaha dhaxalka ah, duurjoogta iyo aagagga dabiiciga ah, garoonnada DNR, wadiiqooyinka iyo waddooyinka tareenka iyo dhammaan jardiinooyinka ay maamusho DNR. The Discover Pass waxaa looga baahan yahay baarkinada gobolka booqashooyinka maalinlaha ah oo keliya.

A Discover Pass waxa looga baahanyahay sido kale dhulka ay maamusho Washington Department of Fish and Wildlife (WDFW). Tan waxaa ku jira helitaanka biyaha iyo meelaha duurjoogta ah, hadaadan horey u jirin a Vehicle Access Pass Waxaa la soo saaray iibka rukhsad ugaarsiga ama liisanka kalluumeysiga.

Ma ka heli karaa kordhin ama dib-u-celin Lacagtayda ah Discover Pass-ka waqtiga dhulalka dawladdu xidhnayd?
Annagu lacag dib uma celino ama kuma bixinno wakhtiga kuwa ku soo baxa Discover Passes.

Kharashka sanadlaha ah ee Discover Pass waa $ 30. Qiimaha kaararka maalin waa $ 10, sidaa darteed kaararka sanadlaha ah laftiisa ayaa bixinkara seddex booqasho oo keliya.

Waxaa loo qeybiyey 12 bilood, taasi waa kharash bille ah oo ah $ 2.50. Dhulka dawladdu way xidhnaayeen laga bilaabo March 23 ilaa 5 May, kaliya shan toddobaad.

Baarkinada Dawladdu waxay kalla kulantay khasaarooyin dakhli oo aad u daran-xaga sare hoos u dhicii waynaaa ayaa jaray hoos u dhicii ugu waynaa ee u dambeeeyay.

Si kastaba ha ahaatee, waxaan kaa codsaneynaa inaad ku raaxeysatid Barxadaha nasashada ee gobolka Washington iyo dhulalka gobolka badiyaa xagaagan iyo wixii ka dambeeya si aad uga hesho qiimaha ugu badan ee suurtagal ah kaarkaaga.

Miyay furanyihiin goobaha ciyaaruhu?
Baarkinka Goobaha ciyaaraha ayaa la xiray illaa ogeysiis dheeraad ah si loo yareeyo soo-gaadhista COVID-19.

Suuliyadu miyye furnaan doonaa?
Haa. Baarkinada furan, suuliyada waxaa laga heli karaa aagagga maalintii loo adeegsado iyo meelaha ay xarumahoodu furan yihiin. Suuliyada waxaa laga yaabaa in lagu xidho meelaha qaarkood iyo xeryaha xidhan.

U diyaargarow Fadlan soo qaado qalabkaaga badbaadada khaaska ah, biyo, saabuun, gacmo nadiifiye iyo warqadaha musqusha, oo xidh wax kasta oo aad soo qaadan karto.

Xafiisyada baarkinka wali waa u xidhan yihiin dadweynaha, sidoo kale xarumaha booqdayaasha iyo dhismayaasha baarkinka.

Ma furan yihiin xeryaha lagu dayactiro maraakiibta, dhulka baadka leh iyo meelaha lagu nasto ee badda?
meelaha dayactirka waa la oggol yahay, dhulka sare waxaa laga heli karaa baarkino furan. Dadka isticmaalaya meelaha dayactirka maraakiibta waa inay dhaqan galiyaan kala fogaansho jireed dadka aan qeyb ka ahayn qoyskooda.

Goobaha nashada ee dowlad-goboleedku way furnaan doonaan si xadidan. Fadlan xidh qashinkaaga, hana ka rajeynin biyo la cabi karo jasiiradaha.

Ilaaliyaha miyaa la maamuli karaa ama la xadidi karaa? Ka waran aagagga xeebta ee loogu talogalay doomaha yar yar?
Badqabnimada waa la kormeeri doonaa oo la xakamayn doonaa sidii ay ahaan jirtay kahor xiritaanka COVID-19. Wax shuruuc oo gaar ahi ma diyaarsana.

Talaagaduhu miyey furan yahiin shaqeynayaana?
Talaagadaha oo kooban ayaa ku yaal beeraha nashada ee furan.

Inta badan talaagadaha Washington waxay ku yaalaan goobaha bada ee dadweynaha iyo gaarkaba. Doonlayaashu waa in ay hubiyaan dakadaha si ay u ogaadaan in ay furan yihiin oo talaagaduhu shaqeynayaan. Goobaha talaagadaha Washington, booqo: parks.state.wa.us/657/Pumpout

Hadii beeraha nasashadu kaliya u furan yihiin isticmaalka maalintii, goormaa la xidhayaa beerta nasashada?
Isticmaalka beeraha nasashada ee maalintii wuxuu xidhmayaa fiidka.

Miyaan u heli doonaa lacag celin dhameystiran nasashadayda ama dalabka hoyga habeenkii?
Waxay ku xidhantahay…

- **Booqdayaasha habeenkii ee ay saameeyeen xidhitaanadu:** Waxaanu la xidhiidhaynaa booqdayaasha habeenkii ee uu saameeyey xidhitaanka si aan u siino lacag celin dhameystiran.
- **Booqdayaasha meelaha habeenkii la seexdo ee furan** waxay heli karaan lacag celin dhameystiran oo joogitaanka habeenka ah, in ka yar labo kharash oo aan loo celineyn ($8 ilaa $10 kharashka balanta iyo $8 ilaa 10 kharashka joojinta ah). Kharashka balantu waa $8 hadii laga sameeyey onlaayn iyo $10 hadii tilifoon laga sameeyey.

Hadii aad wax su'aala ka qabtid balantaada hada, fadlan wac (888) CAMPOUT ama (888) 226-7688.

Ka waran hadii aan leeyahay balan beerta nasashada ah taasi oo hada xidhan? Goormaan ogaan karaa in balantayda la joojiyey?
Waxaanu kaaga mahadcelinaynaa dulqaadkaaga intaanu la tacaaleyno xaaladan isbadelaysa. Waanu ognahay in qorshayaashaada fasaxu muhiim yihiin, waxaananu rajeynaynaa inaad awoodi doontid inaad ku xagaa baxdid beertaada nasashada gobolka Washington ee xagaagan.

Sababtaasi awgeed, waxaanu ka labalabooneynaa inaad joojino balamaha ilaa iyo aanu hubno inaan beerta nasashada dib loo furin doonin taariikhda aad qorshaysay. Sidaasi darteed, waxa suurto gal inaanad dib nooga maqal ilaa iyo maalmo yar ka hor wakhtiga aad qorsheysay joogistaada.

Hadii aanu u baahano inaan joojino balamaha beerta nasashada joogitaanka habeenkii, waxaanu kugula soo xidhiidhi doonaa iimayl, waxaanad heli doontaa lacag celin dhameystiran.

Wixii su'aalo gaara oo ku sahabsan balanta, fadlan kala xidhiidh kooxdayada balamaha 888-CAMPOUT (888-226-7688).

Miyuu dhulka dawladu xidhnaan doonaa hadii ay jiraan arimo cidhiidh ku sahabsan?
Markaan dib u furno dhulka, waxaanu weydiisan doonaa dadku in ay sii wadaan kala fogaanshaha. Hadii aanu ogaano isku imaatino kooxo badan ama dad aan kala fogaaneyn, waxaanu eegi karnaa xidhista beerta nasashada ama meelo ka mida dhexdeeda beerta nasashada.

Hadii walaacyo cusub oo COVID-19 badqabkiisa ah soo baxaan, Washington Departments of Fish and Wildlife (WDFW) iyo Natural Resources (DNR) iyo Beeraha nasashada Gobolku waxay ku xidhi karaan ogeysiis gaaban si loo badbaadiyo caafimaadka dadweynaha iyo badqabkooda.

Sideen ugu sheegi karaa arimaha cidhiidhiga, xashiishka ama walaacyada kale ee meelaha duurjoogta ama doomaha WDFW?
Dadku waxay usoo warin karaan arimaha wabsaaydka Washington Department of Fish and Wildlife's.

Miyaan wali si mutadawacnimo ah u caawin karaa nadiifinta iyo ilaalinta beertayda nasashada ee gobolka?
Maya wakhtigani. Waxaanu uga mahadcelinaynaa mutadawaciintayada iyo saacadahooda dadaalka. Si kastaba ahaatee, wax dhaqdhaqaaq mutadawacnimo ah ka dhici mayaan goobta ilaa ogeysiis kale mooyee. Beeraha nasashada Gobolku waxay ka shaqeynayaan dib u bilaabista marti galinta dalxiiska iyo barnaamijyada kale ee xagaagan. Lasoco wixii warar ah ama kala xiriir Volunteer Program iimayl ama wac (360) 902-8583.

Goorma ayey taandhooyinka iyo doomuhu furmayaan?
Doomaha, taandhooyinka iyo hoyadu waxay xidhnaanayaan ilaa balamaha cusub ee Juun 30 Si ay doomuhu u furmaan Juun, balamaha hada waa in la tixgaliyaa.

Miyey dalxiiska kooxuhu furan yihiin?
Dalxiiska kooxuhu way xidhan yihiin ilaa ogeysiis danbe.

Miyey guryaha dalxiisku furan yihiin?
Guryaha dalxiisku way xidhan yihiin ilaa ogeysiis danbe.